



Dhaqtar Devon Q. Horton, *Kormeeraha guud*

Mudane Dijon DaCosta, Sr., *Guddoonka Guddiga*
 Marwo Deirdre P. Pierce, *Guddoomiye Ku xigeen*
 Marwo Anna Hill
 Marwo Whitney McGinniss
 Marwo Allyson Gevertz
 Marwo Vickie B. Turner
 Dhaqtar Joyce Morley

WIXII FASAXID DEGDEG AH

Luuliyo 25, 2024

Xiriirka:

Donald Porter, *Ed.D.* 678-481-4110
 Carla Parker 404-734-1717

Kormeeraha guud ee DCSD ayaa loo Magacaabay Daah furka Guddiga La talinta Badqabka Dugsiga ee Amniga Wadanka

Dhaqtar Horton wuxuu ku biiray koox sumcad leh oo taqasuska amniga qaranka iyo hogaamada waxbarashada

(STONE MOUNTAIN, GA)— Dugsiga Degmada Gobolka DeKalb (DCSD) waxay si ku faanis leh ugu dhawaaqayaan in Kormeeraha guud Dhaqtar Devon Q. Horton loo doortay inuu ka mid noqdo Guddiga La talinta Dibadda Clearinghouse ee Badqabka Dugsiga ee Waaxda Amniga Wadanka (DHS) ee dhawaan la sameeyay. Guddigaan saameynta leh wuxuu ka koobanyahay qubarada badqabka dugsiga iyo hoggaamiyayaal waxbarasho kuwaasoo bixinayo hagid iyo tallo muhiim ah si loo xoojiyo badqabka iyo amniga dugsiga K-12.

Guddiga La talinta ayaa kala talinayo Xoghayaha Amniga Wadanka Alejandro N. Mayorkas iyadoo u sii marineysa Hay'ada Amniga intarneetka iyo Amniga kaabayaalka (CISA) oo lagu hirgelinayo dhaqamada badqabka dugsiga ee cadeynta ku saleysan. Tallooyinka guddiga waxaa lagu daabacayaa [SchoolSafety.gov](https://www.schoolsafety.gov), bogga faderaalka oo bixinayo illaha badqabka iyo hagida dugsiga.

“Waxaa sharaf ii ah inaan u adeego guddigaan la talinta oo aan gacan ka geysto dadaalka qaran ee lagu abuurayo jawiyo waxbarasho ammaan ah. Caalamka abid isbadelayo iyo halisaha sii kordhaya, waxaan aaminsannahay waaya aragnimadeena wadajirka ah inay u noqoneyso kuwa wax ku ool u ah gacan ka geysashada in lagu sameeyo xalal waxtar leh oo wanaajiyo illaalinta ardaydeena, shaqaalaha, iyo bulshooyinka,” Dhaqtar Horton ayaa yiri.

[Ku dhawaaqoda isbuucaan ee DHS](#) ayaa timid ku dhawaad labo sanno kadib markii [Xeerka Badqabka Bulshooyinka Labada dhinac](#) uu balaariyay Badqabka Dugsiga Faderaalka ee Clearinghouse oo ku waajibo abuurista guddigaan la tallinta. Guddiga wuxuu matalaa aragtiyo kala duwan oo ka imaanayo goobo kala duwan, oo ay ku jiraan waxbarashada, badqabka dadweynaha, amniga internetka, iyo xuquuqda rayidka.

Liis dhameystiran oo xubnaha guddiga la caleema saaray waa [HALKAAN](#).

CISA ayaa isugu yeerayo guddiga kulankooda ugu horeeyay ee Deyrta 2024.

XXX